GP PATIENT SURVEY

# Ku saabsan daraasadda:

**Maxay daraasaddani loo sameeyay?**

Rugta Caafimaadka Sahanka Bukaanka Socodka waxaa loo habeeyey si bukaanada fursad loogu siiyo in ay faallo ka bixiyaan waayo aragnimada ay ka heleen rugta Caafimaadka. Daraasadda waxay ku weydiinaysaa waayo aragnimada aad ka heshay rugta Caafimaadka ee xaafaddaada iyo adeegyada kale ee NHS ee xaafadda, waxaana ku jira su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga guud. Daraasadda waxay bukaanada weydiin doonaa baaxada arrimahaan. Sida sida ey ugu sahlantahay ama ugu adag tahay bukaanada in ay ballan la dhigtaan dhakhtarkooda, ku qanacsanaanta saacadaha la furaayo, tayada daryeelka ay ka helaan dhakhaatiirtooda iyo kalkaalisooyinka isbitaalkooda Rugta Caafimaadka. Iyo kuwo kale oo la xiriira.

Jawaabaha aanu heleynaa waxay ka caawinayaan NHS inay hormar ku salayso adeegyada caafimaadka deegaanka ee dadka adiga oo kale ah iyo qoysaska. Laba iyo tobankii bilood ee lasoo dhaafay, shaqada GP waxaa lagu sameeyay dhawr is badal iyada oo laga jawaabayo safmarka COVID-19. Sidaas darted, waxaa ay intii hore kasii muhiimsan tahay in aanu helno macluumaadkaaga waxa aad kala kulantay adeegyada NHS ee deegaankaaga xataa hadii aanad booqan GP gaaga dhawaan, oo aad hore uga jawaabtay su'aalaha.

**Yey dhabtii ka timid arrintani?**

Ipsos MORI, waa wakaalad madaxbannaan, waxay maareyneysaa daraasadda ayagoo ka wakiil ah NHS England.

**Maxaa yeeley in wareysi-qoraaleed in ii la soo diro?**

Waxaa laguugu soo diray wareysi-qoraaleedka maxaa yeelay waxaa lagaa xushay diwaanka bukaanadda dadka waaweyn ee Rugta ama Xurunta Caafimaadka dal-ka Ingriiska. Waxay ku dhaw yihiin 1 milyan bukaan socodka ee dad waaweyn ah ee ku qoran Rugtooda England ee loo soo doortay wareeggan Rugta Caafimaadka Sahanka Bukaanka Socodka.

**Maxaa la iigu soo diray fariinta qoraalka ah?**

Fariint qoraalka ah waxaa loosoo diray si laguu xasuusiyo inaad ku jirto xog uruurintan, marka la helo lambarka taleefanka gacanta. Fariin kasta waxaa la socda link gaar ah, oo uu la socdo macluumaadka duwaankaagu. Tani waxay kuu sahlaysaa inaad ka qayb gasho online ahaan adiga oo aan gelin lambarkaaga xog uruurinta ama baaswoodhkaaga.

**Maxay daraasaddani ay u dhaceysaa mar kale?**

Rugta Caafimaadka Sahanka Bukaanka Socodka waxay bukaannada u sii tahay fursad ay ugu sheegaan waayo aragnimada iyo waxyaabaha ay jecel yihiin ee ku saabsan daryeelka iyo adeegyada ay ka helaan rugtooda Caafimaadka. Xittaa haddii aad buuxisay sannadkii hore wareysi-qoraaleed waa muhiim in lagaa maqlo kuwii ugu dambeeyay ee aad la kulantay, sannadkani xittaa waxaan ku soo darnay dhawr su'aalo ee quseeya arrimmaha bukaanka.

**Ma inaan ka qeyb qaato miyaa?**

Ka qeyb qaadashada waa ikhtiyaar, sidaa awgeed ma aha inaa buuxiso werey-qoraal. Laakiin natiijadda waxay sawir saxa ka siinaysaa waayo'aragnimada dadka ay u leeyihiin Rugta Caafimaadka ama Xarunta Caafimaadka waxaan u baahannahay aragtiyo badan oo dad kala duwan. Sidaas darted waxaan jeclaan laheyn dad badan intii la heli karo inay buuxiyaan wareysi-qoraalka.

Daraasaddani waa u fursad bukaanadda si ay wax ugu yiraahdaan sida ugu fiican ay hawlgal dhakhaatiirtooda ugu soo gudbiyaan. Waxaan ku rajo weynahay bukaanada loo xushay daraasaddaani inay ka qeyb qaataan inay isticmaalaan fursaddaani si ay dib ugu war-celiyaan fikradahooda arrimahaan aadka muhiimka u ah. Markastoon helno warcelino badan, waxaan heleynaa sawirka saxa ah ee sida ay dhaktaartiirta iyo kalkaalisooyinka sida ay wax u qabtaan.

Hadii aanad doonaynin in laguu soo diro wax xasuusin ah oo ku saabsan xog uruurintan, fadlan waxa aad soo dirtaa xog uruurina oo mamdhan oo ku jirta bushqada boosta ee bilaashka ah ee lagu siiyay. Sidoo kale, waxa aad la xidhiidhi kartaa khadla caawimaada xog uruurinta Ipsos MORI ee bilaashka ah ee 0800 819 9146 (8 subaxnimo ilaa 9 habeenio Isniin ilaa Jimce; 10 subaxnimo ilaa 5 galabnimo Sabtida) ama iimeelka Ipsos MORI ee GPPatientSurvey@ipsos.com.

**Waxa aan cabasho ka qabaa GP gayga oo kumana jirto xog uruurintan. Sidee ayaan cabashadaa u gudbinayaa?**

Ipsos MORI kaama caawin karto su'aalaha kale ee aad qabtid ama cabasho aad ka qabto dhakhtarkaaga, kalkaaliyahaaga, ama adeegga GP. Ipsos MORI waxa keliya oo ay qabaneysaa GP Patient Survey ayadoo ka wakiil ah NHS England.

Haddii aad dooneysid inaad ka talo bixiso ama ka cabatid adeegga ama daryeelka ay bixiyaan dhakhtarkaaga ama GP, waa in aad marka hore la xiriirtaa xarunta. Haddii aad qabtid cabasho, xarun walba waxa ay leedahay xubin shaqaalaha ka mid ah oo u qaabilsan cabashooyinka waxa uuna ama ay isku dayayaa/dayeysaa inuu/ay arrinta kula xalliyo/xalliso.

Amaba, waxa aad la xiriiri karta NHS England taasoo amartey adeegyada ay xaruntaada bixiso. Si aad ula xiriirto NHS England:

- Iimeel ka: England.contactus@nhs.net adoo ku qoraya "For the attention of the complaints team" leenka ujeeddada
- Telefoonka waa 0300 311 22 33

Xogo dheeraad ah oo la xiriira sida loo bixiyo cabasho ayaa laga heli karaa

bogaha:

- https://www.england.nhs.uk/contact-us/complaint/
- https://www.nhs.uk/NHSEngland/complaints-and-feedback/Pages/nhs-complaints.aspx

**Ma arki karaa natiijada sahankaan?**

Haa. Natiijadda sahanka waa la dhabacey waxaana laga heli karaa barta shabakada www.gp-patient.co.uk.

# Buuxinta wareysi-qoraalka:

**Ma inaan ka jawaabaa su'aalaha oo dhan?**

Ka jawaabidda su'aalahaan, oo ay ku jiraan su'aalaha deegaanka qaybta "macluumaadka igu saabsan" waa ikhtiyaar, sidaas darted ma ku qasbanid inaad ka wada jawaabto. Laakiinse waxaan ku rajo weynahay inaad ka qeyb qaadato, tan oo na siineyso sawirka suurtagalka ah ee ugu fiican ee waayo'aragnimada dadka. Xittaa waxaa jira su'aalo laga yaabo inaan ku weydiino inaad ka boodid, jawaabahaagii hore awgeed. Tusaale, waxaad u baahantahay inaad ka jawaabtid su'aasha 8 haddii aad haa summaday su'aasha 7, laakiin fadlan si taxadir ah u raac tilmaamayaasha wareysi-qoraalka si taxadir ah.

**Ma sax baan ku qoraa ama isku tallaab sanduuqa?**

Waad ku qori kartaa sax ama iskutallaab hal sanduuq gudahiisa jawaabta oo aadka ugu dhaw ra'yigaaga ama waayo'aragnimo.

**Maxaa dhici haddii waresi-qoraalka ay igu adagtahay  warqad ku buuxin**

Ipsos MORI waxay bukaanadda ay ku adag tahay buuxinta wareysi-qoraaleedka u fidineysaa lambaro taleefoon. Fadlan wac 0800 819 9146  inta u dhaxeysa 8 subaxnimo iyo 9 subaxnimo maalmaha shaqo, ama Sabtida 10 subaximo illaa 5 galabnimo.

Bukaanada doorbidaayo inay ku buuxin wareysi-qoraalka warqad waxay ku buuxin karaan qadka-furan ado booqanaya www.gp-patient.co.uk/survey. Fadlan waxaad ogaataa, in la ogolaan doono bukaankiiba hal warcelin.

**Maxay tahay calaamadda BSL ee bogga hore ee wareysi-qoraalka?**

Shabbada BSL ee ku taalo bogga hore ee wareysi-qoraalka waa Calaamadda Tilmaan Luqeedka Ingiriisiga.

Tilmaan Luqeedka Ingiriisiga. Waa midda ugu caansan ee dhanka Tilmaan Luqeedka Ingiriisiga. Luqad ahaan TLI waxay qabtaa naxwaheeda u gaarka ah iyo sumaddooda, mana ku tiirsana ama xiriir dhawna lama laha Ingiriiska lagu hadlo.

Laga bilaabo Janaayo 2009 macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Sahanka Bukaan ee Dhakhtarka Guud iyo nooc sahanka ah oo internetka ah ayaa lagu heli doonaa Luqad Calaamadka British-ka oo loo maro websaytka – www.gp-patient.co.uk

Tilmaamaha loogu talagalay buuxinta sahanka iyada oo loo maro xidhiidhinta internetka ayaa waliba laga heli doonaa  Luqad Calaamadka British-ka, sahankuna wuxuu si buuxda ku habboonaan doonaa heerarka marin u helka W3C.

**Khalad ayaan sameeyay? Maxaan sameeyaa?**

Weli waan jeclaan laheyn inaad noo soo dirto wareysi-qoraalka aad soo buuxisay xittaa haddii aad sameysay qalad. Fadlan si dhan u buuxi jawaabta aan saxa ahayn ka dibna calaameye sanduuqa saxa ah.

**Wareysi-qoraalkeygii ayaa iga lumay; nuqul kale ma ii soo direysaan?**

Waxaan u soo direynaa wareysi-qoraal xasuusin ah dadka aan kuwoodii soo celin, sidaas daraadeed, dhawrka usbuuc ee soo socda waad heleysaa.

**Ma siin karaa wareysi-qoraalka Xaaskeyga/saaxikeey/qofkale inuu buuxiyo?**

Maya, wareysi-qoraalka wuxuu weydiinayaa waayo aragnimada uu u leeyahay qofka magaciisa ku qoran warqadda, sidaad darted, inkastood weydiisan karto caawinaad buuxinta wareysi-qoraalka, waa inaad si buuxda u dhameystirtaa waayo aragnimadaada aad u leedaha.

**Maka jawaabi karaa ballannada aan u sameeyay dad kale?**

Haa, laakiin waxa ay ku kooban tahay oo keliya qeyb ka mid ah xogwareysiga. Xogwareysiga badankii ayaa weydiinaya arrimo la xiriira waxyaabaha uu la kulmay qofka magaciisa lagu xusay warqadda. Qeybta cinwaanka looga dhigay 'Balan samaynta' ayay suurto gal tahay in looga jawaabo su'aalaha la xiriira ballamada aad u qabatid dad kale.

**Ma ka caawini karaa qof kale u buuxinta wareysi-qoraalka?**

Haa, Ma xumma. Haddii saaxibkaa ama qaraabadaada u baahdaan caawinaadda buuxinta wareysi-qoraalka, waad siin kartaa caawinaad. Laakiin jawaabta waa inay la xiriirtaa oo keliya waayo aragnimadooda.

**Ma weydiisan karaa in qof kale iga caawiyo buuxinta wareysi-qoraalka?**

Haa, Ma xumma. Haddii aad u baahantahay caawinaadda buuxinta wareysi-qoraalka, waad weydiisan kartaa saaxibkaa ama qaraabadaada. Laakiin jawaabaha waa inay la xiriirtaa waayo aragnimadaada oo keliya.

**Ma weydiisan karaa in qof kale iga caawiyo buuxinta wareysi-qoraalka?**

Haa, Ma xumma. Haddii aad u baahantahay caawinaadda buuxinta wareysi-qoraalka, waad weydiisan kartaa saaxibkaa ama qaraabadaada. Laakiin jawaabaha waa inay la xiriirtaa waayo aragnimadaada oo keliya.

**Waxaan bedelay isbitaalkeygii usbuucii hore/bishii hore/goor dhaw, ma buuxin karaa wareysi-qoraalka?**

Haddii aad bedeshey xaruntaada GP tan iyo bishii Nofeembar, fadlan ka jawaab su'aalaha la xiriira xarunta hore lagaaga diiwaan geliyey ka dibna ka jawaab bixi su'aalaha wax kaa weydiinaya xaruntaada GP. Hase yeeshee, su'aalaha la xiriira xarunta caafimaadka guud, fadlan ka feker xarun aad hore uga qabatay ballan la xiriirta caafimaadka guud. Tani ayaa noqon karta goob dhakhtar guud, sida

xarumo ama goobo GP.

**Waxaan booqday GP-ga sannaddii hore laakiin waxaana la ii soo diray wareysi-qoraaleed. Ma soo buuxi yaa?**

Haa, haddii aad iska diiwaan gelisey xarun GP – xitaa haddii aadan dhowaan booqan GP, kalkaaliye ama xirfedlayaal caafimaad oo kale jawaabahaaga ayaa noqonaya kuwo weli qiime inoogu fadhiya. Waxa jira su’aalo ka mid ah xogwareysiga kuwaasoo weydiinaya goortii kuugu dambeysey ee aad isku daydey inaad ballan ka qabsato xarun caafimaad guud iyo goortii kuugu dambeysey ee aad ka qabatey ballan xarun caafimaad guud; arrimahani ayaa naga caawin doona in aan fahanno in arrintaadu ay tahay mid dhow ama mid aan dhoweynba.

**Ma arko Ruteyda Caafimaadka (dhakhtar), kalkaaliso oo kaliya. Weli ma buuxin karaa daraasaddaan?**

Haa, weli waa aad buuxin kartaa foomka xogwareysiga. Su'aalaha badankooda ayaa guud ahaan ku saabsan xarunta guud ee dhakhtar, waxaana ka mid ah ballamaha lala yeesho GP, kalkaaliye ama xirfedle kale oo caafimaad.

**Goorme u baahnahay inaa dhib u soo celiyo?**

Fadlan dib u soo celi xogwareysigaaga oo buuxa sida kuu dhaqso badan, si walbana fadlan u hubi in uu xogwareysiga na soo gaaro ka hor:

31ka Maarso 2021

**Ma aanan heli baqshad/wareysi-qoraaleed ee warqadeyda?**

Naga raali ahaw haddii ay tani dhacday. Goor dhaw ayaan kuu soo direynaa warqad xasuusin oo ay la socoto nuqul kaloo ah wareysi-qoraal ee fadlan buuxi daraasadda markaad hesho. Ama, haddii aad haysato wareysi-qoraaleed oodna rabto inaad noo soo dirtotaa ka hor, fadlan ku rid wareysi-qoraalka baqshad ku calaameysan oo keliya “FREEPOST GP PATIENT SURVEY”. bushqad uma baahna.

# Ku Buuxinta Barta-shabakada/qadka-furan:

**Daraasaddda ma ku buuxin karaa qadka-furan?**

Haddii aad doorbideyso inaad ku buuxiso daraasaddaan barta shabakada, fadlan booqo www.gp-patient.co.uk/survey sidaa u raacna barta shabakada sahanka bukaan socodka. Ka dib waxaad u baahaneysaa inaad geliso tirsigaaga raadraaca 11 ah/isticmaalaha magaciisa haddii lagu weydiiyo isticmaalaha magaciisa, sidoo kale furahaaga sirta kuu ah. Tirsiga raadraaca iyo furahaaga sirta waxay ku daabacan yihii bogga hore ee wareysi-qoraalka. Fadlan waxaad ogaataa, halkii warcelinba hal bukaan ayaa la ogolyaha.

**Waxaa iga lumay keydkii-faahfaahin/radraacii la iiga baahnaa inaan ku buuxiyo daraasadda qadka-furan?**

Hadii aad wayday macluumaad aad ku galay, fadlan iimee u dir GPPatientSurvey@ipsos.com dalabkaaga oo iimeel ayaan kuusoo diri doonaa. Waxay qaadan doontaa dhawr maalmood maadaama oo dhamaan xog uruurinta iyo baaskoodhada lagu hayo meel amaan ah.

Sidoo kale, waxa aad sugi kartaa warqada xigta ee xasuusinta iyo xog su'aalaha, kuwaas oo loo diri doona qof kasta oo aan buuxin xog uruurinta. Lambarkaaga xog uruurinta iyo baaskoodhkaaga waxaa uu ku qornaan doonaa boga kowaad ee su'aalaha.

Fariimaha qoraalka waxaa sidoo kale loo diraa si laguu xasuusiyo inaad xog uruurinta ku jirto, lambarka taleefanka ee aad heli karto. Fariin kasta oo qoraal ah waxaa la socda link gaa rah, oo uu la socdo macluumaadka lagu galayo. Waxay taasi kuu sahlaysaa inaad gasho online ahaan adiga oo aan u baahnayn inaad geliso lambarkaaga ama baaswoodhkaaga.

**Halkeen ka heli karaa magaca isticmaalaha/tirsiga raadraaca si aan ugu buuxiyo daraasadda qadka-furan?**

Magaca isticmaalha/tirsiga raadraaca iyo furaha qarsoon ee lagu buuxinaayo daraasada qadka-furan waxay ku daabacan yihiin bogga hore ee wareysi-qoraalka qeybta ku sumadeysam calaamadda kumbuyuutarka.

# Ka qeyb qaadashada:

**Maxaan u heli waayay wareysi-qoraaleed? Sideen ku helaa mid?**

Wareysi-qoraaleedka waxaa loo diray dad la xushay oo ka diiwaan gashan Rugta Caafimaadka Iglan.  NHS England waxay ka xusheen magacyadooda si baqtiyaa nasiib ah NHS-ta liiska bukaanadda ka diiwaan gashan Rugta Caafimaadka. Si ay u xaqiijiyaan in daraasaddanin ay tahay mid jirta, Ipsos MORI uma direyso wareysi-qoraaleed dadka aan lagu xulan baqtiyaa nasiib si ay ugu qeyb qaataan daraasaddaan.

**Waqti xaadirkaan kama diiwaan gashani GP, ma buuxin karaa wareysi-qoraalka?**

Xogwareysigan ayaa waxa loo dirayaa dad ka diiwaan gashana xarun GP lixdii bilood ee ugu dambeysay. Sidaa daraadeed haddii aad ka diiwaan gashaneyd xarun muddadaasi, xitaa haddii aadan hadda ka diiwaan gashaneyn, weli waa aad buuxin kartaa xogwareysiga. Fadlan ka jawaab su’aalaha la xiriira xarunta aad ka diiwan gashaneyd muddadaasi (ama inta badan muddadaas) adoo ka jawaabaya su’aalaha wax kaa weydiinaya xaruntaada GP. Ha yeeshee, su’aalaha ku saabsan guud ahaan xarunta, fadlan ka feker meel ama xarun guud oo aad ballan ka qabatey. Tani ayaa noqon karta goob adeeg dhakhtar, sida xarumo iyo goobo dhakhtar guud.

**In dhawba xiriir lama lihi Rugteyda Caafimaadka, ma buuxin karaa wareysi-qoraaleedka?**

Haa, weli waa aad buuxin kartaa xogwareysiga. Haddii ay jirto su'aal aan ku quseynin fadlan dooro 'Ma quseyso' (meeshii lagu muujiyey) ama u daa inay goobtaasi bannaanaato. Waxa kaloo aan geliney tilmaamo kaa caawinaya in aadan ka jaawaabin su'aalaha aan ku khuseynin.

**Yaa ila soo xariiri doona hadii aan rabin in aan ka qeybqaato?**

Qeybkaadashada waa ikhtiyaar, qasab ma’ahan. Laakin waxaa rajeyneynaa in aad ka qeybkadatid maadaama sidaas ayaa ku garaneyna arimaha aad la kulantidd marki aad tagtid Rugtaada Caafimaadka ama aad wacdan dhagtarkaga.

Hadii aanad doonaynin in laguu soo diro wax xasuusin ah oo ku saabsan xog uruurintan, fadlan waxa aad soo dirtaa xog uruurina oo mamdhan oo ku jirta bushqada boosta ee bilaashka ah ee lagu siiyay. Sidoo kale, waxa aad la xidhiidhi kartaa khadla caawimaada xog uruurinta Ipsos MORI ee bilaashka ah ee 0800 819 9146 (8 subaxnimo ilaa 9 habeenio Isniin ilaa Jimce; 10 subaxnimo ilaa 5 galabnimo Sabtida) ama iimeelka Ipsos MORI ee GPPatientSurvey@ipsos.com.

# Guud ahaan:

**Waa imisaa wacida nambaradda 0800?**

Dhammaan wacidda 0800 ee nambarada taleefoonka waa lacag la'aan marka laga isticmaalo/ama laga soo dira leenka taleefoonka caadiga ah ee UK.

**Waa maxay Ipsos MORI?**

Ipsos MORI waa urur dareeseed diiwaan gashan oona madax bannaan si adagna u daneeya Bulshooyinka Baaritaanka Suuqa waxayna ku saleysan yihiin sharci. Ipsoso iyo MORI, taasoo si kala baxsan laga yaabo inaad u maqashay, waxay isku darsameen Oktoobar 2005 si ay u sameeyaan ururka labaad ee baaritaanka ugu ballaaran UK dhexdeeda. Ipsos MORI waxaa lagu abaalmariyay qaab hawleedka caalamiga joogtaga aha ee cusub. ISO 20252 iyo Sugidda Macluumaadka caalamiga ah ISO 27001 qiimeyn dhab ah ee urur Badbaadada Tayada Suuqgeynta. (MQA), waan wakaalad daraasaadkii ugu horeysay ee dunida oo hannata labadaan heerood. Macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Ipsos MORI fadlan aad www.ipsos-mori.com.

# Qarinta iyo ilaalinta xogta

Macluumaadka qaybtaani waxay sharraxaysaa sida iyo sababta aan ugu adeegsaneyno daraasaddan xogtaada shaqsiyadeed, Xuquuqdaada iyo sida aad noola soo xiriiri karto haddii aad wax su'aalo ama walaac ah ka qabtid isticmaalka xogtaada.

**Sideed ku heshay faahfaahinta macluumaadka xidhiidhkayga?**

Ipsos MORI waxay kuu soo dirayaa suaalo waydiimada qoraalka ah ayada oo wakiil ka ah NHS England. Magacyada waxaa laga soo xushay si aan kala sooc lahayn liiska NHS ee bukaanka ka diiwaan gashan GP. NHS England waxay la wadaagtay in yar oo xadidan oo macluumaadkaaga shaqsiyadeed ah si Ipsos MORI ay kuugu casuumto inaad kaqeybqaadato cilmi baaristaan. Xogtan waxaa ku jira:

- Magacaaga iyo cinwaankaaga
- Lambarkaaga tababarqaadashada GP iyo lambarka NHS
- Jinsiyada iyo bisha/sanadka dhalashada
- lambarka taleefanka gacanta (hadii la heli karo)

Ipsos MORI waxay xafidi doontaa xogtaada si qarsoodi ah waxayna kaliya u isticmaali doontaa faahfaahinta xiriirkaaga si ay kuugu soo casuunta inaad ka qayb qaadato xog uruurinta. Marka sahanka la dhammeeyo, Ipsos MORI waxay si amaan ah u burburin doontaa faahfaahinta xiriirkaaga. Ipsos MORI wax macluumaad ah oo ku saabsan caafimaadkiisa cidna kama hayso.

**Maxuu yahay saldhiggaaga sharciga ah ee ku saabsan hawl galinta xogtayda shakhsiyeed?**

NHS England waxay sameyneysaa baaritaankan si ay uga caawiso NHS inay horumariso waxqabadka GP ga iyo adeegyada kale ee NHS ee maxalliga ah si ay sifiican ula kulmaan baahiyaha maxalliga ah iyada oo laga jawaabayo fikirka bukaanka. Waxaa saaran masuuliyad sharci (hoos timaada qaybta 13Q ee NHS Act 2006) in laga qayb geliyo shacabka bixinta adeegyada bukaanka NHS.

NHS England ayaa ah kantaroolka macluumaadka ee ku saabsan ka hawl galinta xogta shaqsiyadeed ee GP Patient Survey, taas oo micnaheedu yahay inay iyagu mas'uul ka yihiin hubinta in howshu u hoggaansan tahay Sharciga Ilaalinta Guud ee Xogta (UK GDPR). Aasaaska NHS England ee ku saabsan ka shaqaynta sharci ahaaneed ee GP Patient Survey waa qodobka 6(1) (e) - "*hawl galinta waxay lagama maarmaan u tahay fulinta waxqabadka lagu fuliyay danaha guud ama layliga awooda rasmiga ah ee laga maamulayo hagaha".* Ka shaqaynta macluumaadka shakhsi ahaaneed ee gaarka ah (sida macluumaadku ku saabsan caafimaadka, qoomiyada ama isirka ama rabitaanka galkmada) kaas oo ay tahay inuu buuxiyo shuruudo dheeraad ah, Xeerka 9(2)(h) " ka shaqaynta ayaa daruuri u ah wixii ujeedo kahortaga ama daawaynta caafimaadka ah, wixii qiimaynta awooda shaqo ee shaqaalaha, shaybaadhka caafimaadka, bixinta daryeelka caafimaadka ama bulshada ama daawaynta ama maamulida caafimaadka iyo nidaamyada daryeelka iyo adeegyada Taas macnaheedu waa in NHS England u adeegsan karto xogta shaqsiyadeed ee ay kaa hayaan adiga cilmi baaris la xiriirta dhowrista habboon ee meesha taal. Ipsos

MORI waa sameeyaha xogta ku shaqeynaya tilmaamaha hay'adda NHS England si sahaminta loo dhiibo.

Waxaad ka heli kartaa Ogeysiiska Asturnaanta ee NHS England https://www.england.NHS.uk/contact-us/privacy/privacy-notice/.
Kaqaybqaadashada sahaminta waa ikhtiyaari.. Si kastaba ha noqotee, haddii aadan dooneyn inaad kaqeybqaadatid mustaqbalka fadlan soo dir lambarkaaga sahanka (oo ku yaal dusha warqadda ama wejiga hore ee su'aala waydiimaha qoraalka) oo muujinaya inaad jeceshahay inaad ka baxdo gppatientsurvey@ipsos.com.

**Miyaa Xogta Qaranka Lagu dabaqayaa kabixitaanka xog-ururintan?**

Maya. Department of Health and Social Care waxay xaqiijisay in Ka bixista Macluumaadka Qaranka kaliya la adeegsan karo marka macluumaadka bukaanka qarsoodiga ah loo isticmaalo ujeeddooyin aan ahayn daryeelka qofka. Macluumaadka bukaanka qarsoodiga ah waxaa ka mid ah macluumaadka caafimaad ee ku saabsan qofka (sida xaalad kasta oo caafimaad, dawooyin la qoray ama daryeel la helay), iyo macluumaad kasta oo ku saabsan shakhsiga lagu helay diiwaanka caafimaadka qofka. GP Patient Survey wuxuu adeegsadaa xogta tirakoobka iyo faahfaahinta xiriirka ee laga soo qaatay diiwaangelinta bukaan-socodka ee dhaqamada GP ga si loo xulo oo lala xiriiro shaqsiyaadka si xog aruurin loogu sameeyo. Xogtan shaqsiyadeed looma kala soocin macluumaadka bukaanka qarsoodiga ah iyadoo aan loo adeegsan ama marin loo helin macluumaad caafimaad. Sidaas oo kale, Ka bixista Xogta Qaranka ma khusayso GP Patient Survey.

**Ma heshay xogtayda caafimaadkayga?**

Maya, gabi ahaanba maya. Ipsos MORI waxaa kaliya la siiyay lambarkaaga xeerka shaqada GP ga iyo lambarka NHS, magaca, macluumaadka xidhiidhka cinwaanka, bisha iyo sanadka dhalashada, iyo jinsiga. NHS England ma aysan siinin Ipsos MORI wax macluumaad ah oo ku saabsan caafimaadkaaga - kani wuxuu sir kuu yahay adiga iyo GP gaaga.

Ipsos MORI waxaa lagu siiyay lambarkaaga NHS ta si ay kuu aqoonsadaan haddii aad horey uga baxday sahaminta si loo hubiyo inaysan mar dambe kula soo xiriirin. Faahfaahinta xiriirkaaga waxaa loo isticmaalaa inay kula soo xiriiraan oo ku saabsan sahanka, iyo lambar tababar qaadashada GP ga waxaa loo adeegsan doonaa oo keliya sidii loogu xiriirin lahaa jawaabaha habdhaqanka GP ga.
Macluumaadka ku saabsan bisha iyo sanadka dhalashada iyo jinsiga ayaa loo isticmaali doonaa oo keliya in la hubiyo in macluumaadka xog-ururinta aan la magacaabin ay u dhigmaan astaanta guud ee dadka wax la qabanayo sida ugu dhow ee suuragalka ah

**Yaa macluumaadkaaga xidhiidhka lala wadaagay**

Ipsos MORI waxay la shaqaysaa ururro wax soo saare qaarkood si ay u maamusho sahamintan, waxayna u baahan doontaa inay u shaaciso **macluumaadkaaga xidhiidhka** ururadan wax soo saara ujeedadaas. Hay'adahan wax soo saare waxaa ka mid ah:
- Adare SEC; daabacaadda waraaqaha iyo weydiimaha qoraalka
- Text Local; qaybinta xusuusiyeyaasha fariimaha qoraalka

- Whistl iyo Royal Mail; qaybinta iyo kudirista boostada

Wax soo saarayaashan ayaa la oggolaaday oo ay u hoggaansan yihiin Shuruucda Ilaalinta Guud ee Xogta

**Kuukis**

Qaar ka mid ah xogururinta onlaynka ah ayaa aruurisa macluumaadka iyagoo adeegsanaya 'cookies'. Kuwani waa faylal yaryar oo lagu keydiyo kumbuyuutarkaaga. Faylashani waxaa loo istcimaalay sida ugu kooban uguna macquulsan oo keliya xakameynta tayada, ansaxinta iyo, tan ugu muhiimsan, si looga hortago in aan kuu soo dirno xusuusino ku saabsan sahanka khadka tooska ah ee aad hore u dhammaysay. Waa kuu suurta gal inaad tirtirto 'cookies' ama si looga hortago isticmaalkooda adoo hagaajinaya dejimaha websayd raadinta kombiyuutarkaaga.

Ipsos MORI sidoo kale waxay si otomaatig ah u qabataa macluumaadka ku saabsan nidaamka hawlgalkaaga, soo bandhigida qaababka iyo nooca websayd raadinta,oo ay kujiraan cinwaanka IP adress ka, si loo hubiyo in foomka waydiimaha qoraalka ah ee xogururinta loo gudbiyay qaab ku habboon barnaamijka softiweerka ee kombuyuutarkaagu adeegsanayo. Ipsos MORI kombiyuutarkaaga kama qabato macluumaad kale.

**Maxaa ku dhacaya jawaabahayga? Dhakhtarkaygu ma arki doonaa jawaabahayga sahankan?**

Jawaabahaaga ayaa la iskugu keenayaa jawaabaha dadka kale lagumana xiriirinayo magacaaga, macluumaadkaaga xidhiidhka ama lambarkaaga NHS. Jawaabahaaga shaqsiyeed ee su'aalaha waxaa xafidi doona Ipsos MORI, iyo shaqaalaha NHS England iyo baarayaashu. Qofna ma awoodi doono inuu kuu aqoonsado natiijada kasta oo la daabaco.
Jawaabahaaga looma celin doono dhakhtarkaaga ama tababar qaadashada GP ga. Ipsos MORI adiga oo wakiil ka ah NHS England, ugu soo daabac si qarsoodi ah jawaabihii kale ee ka soo baxay goobtaada, websaydhka halkan: https://gp-patient.co.uk/surveysandreports

**Yaa loo aqoonsaday shaqaalaha NHS England iyo cilmi baarayaasha sideese u isticmaali karaan natiijooyinka?**

Si loo awoodo in loo isticmaalo xogta sahanka heerkiisa bukaan socodka, dhammaan cilmi baarayaashu, oo ay ku jiraan kuwa ay shaqaalaysiisay NHS England iyo ururada kale, waa inay codsadaan fasax. Codsi kastaa waa inuu maraa geedi socod oggolaansho adag, oo qeexaya shaqada la qaban doono, iyadoo la isku raacay heshiis ah in daabicid kasta kaliya loo gudbin doono xogta si qarsoodi ah. Dhamaan adeegsadayaasha kale waxay marin u heli karaan macluumaadka qarsoon ee heer qaran, CCG ama heer tababar.

**Halkee lagu hayn doonaa oo lagu hawl galin doonaa xogtayda shaqsiga ah?**

Dhamaan macluumaadkaaga shaqsiyeed ee la isticmaalay lagana aruuriyay sahankaan waxaa keydin doona Ipsos MORI xarumaha xogta iyo adeegaha gudaha Boqortooyada Midowday.

**Sideed ku hubin doontaa in macluumaadkeyga shaqsiyadeed uu xafidan yahay?**

Shirkadda Ipsos MORI waxay si dhab ah u qaadataa mas'uuliyadeeda sugida amniga waxayna adeegsanaysaa taxaddarro kaladuwan si loo hubiyo in macluumaadkaaga laga ilaaliyo khasaare, xatooyo ama si xun u adeegsi. Taxaddarka amniga waxaa ka mid ah amniga jir ahaaneed ee habboon ee xafiisyada iyo helitaanka xadidan iyo helitaanka xaddidan ee nidaamyada kumbuyuutarrada. Tallaabooyin adag ayaa la qaaday si loo hubiyo in macluumaadka shakhsiyadeed si xafidan loo xafidayo oo ay arki karaan oo keliya shaqaalaha si toos ah ugu lug leh mashruuca.

Ipsos MORI waxay leedahay xisaab hubin gudaha ah iyo mid dibadeed oo joogto ah kontoroolkeeda sugida amniga iyo dhaqamada shaqada, waxaana laga aqoonsan yahay Heerka Caalamiga ah ee Amniga Macluumaadka, ISO 27001.

Jawaabahaaga shaqsiyadeed ee su'aalaha laguma xiriirin magacaaga, macluumaadkaaga xidhiidhka ama lambarkaaga NHS. Ipsos MORI, oo ay oggolaadeen shaqaalaha NHS England iyo baarayaasha, waxay ula dhaqmaan jawaabaha si shaqsi ahaan kuwo asturan oo u hoggaansan dhammaan dhinacyada iyo qodobbada Xeerka Ilaalinta Xogta Guud iyo dhammaan shuruucda kale ee la xiriira, oo ay ku jiraan shuruudaha kaydinta sugan.

**Mudo intee leeg ayay Ipsos MORI hayn doontaa xogteyda shaqsiyadeed iyo jawaabaha la aqoonsan karo?**

Ipsos MORI waxay hayn doontaa xogtaada oo keliya qaab ay ku aqoonsan kara ilaa iyo inta lagama maarmaanka u ah taageerida mashruuca cilmi baarista iyo natiijooyinka. Ficil ahaan, tan macnaheedu waa in marka aan si qanacsanaan ah uga soo sheegno natiijooyinka cilmi-baarista ee magacaagu aanu la socon, waxaan si badbaado leh uga saari doonnaa macluumaadka haybtaada sheegaya, adoo cadeynaya xogta laga helo nidaamyadeena iyo dhamaan kuwa wax soo saarayaasha.

Daraasaddan, waxaan si badbaado leh uga saari doonnaa macluumaadkaaga shaqsiyadeed nidaamyadeena Sebteember 2021..

**Sidee dhakhtarkaygu ugu lug leeyahay sahamintan?**

Su'aalaha waydiimaha qoraalka ah waxaa loo diraa xulasho aan kala sooc lahayn oo dadka ka diiwaangashan GP ga gudaha England, magacaagana waxaa lagu soo xushay si aan kala sooc lahayn liiska bukaanka ka diiwaangashan GP ga oo ay hayso NHS England.

Habdhqadanada GP ga waa inay ogaadaan in sahanku socdo. Markii sahaminta la dhammeeyo waxay marin u heli doonaan ayada oo la magacaabin, natiijooyinka tirakoobka ee ku saabsan dhaqankooda waxaa laga heli karaa websaydhkan https://gp-patient.co.uk/surveysandreports, laakiin ma heli doonaan jawaabaha shaqsiyadeed.

**Xog aruurinta ururintu ma heshay oggolaansho anshaxeed?**

Kahor intaadan bilaabin sahanka koowaad 2007 Ipsos MORI waxay la tashatay Central Office for Research Ethics Committee (COREC) waxaana lagula taliyay in sahankani yahay 'qiimeyn adeeg' halkii ay ka ahaan laheyd 'baaritaan saafi ah' - si loo qiimeeyo adeega ay GP yada siiyaan bukaankooda. Natiijo ahaan, sahankan uma baahna oggolaansho rasmi ah cilmi baaris caafimaad. Si kastaba ha noqotee, Ipsos MORI waxay si adag u adeecdaa qawaaniinta cilmi baarista anshaxa ee Market Research Society, iyo faahfaahinta bukaanka la siiyay looma isticmaalo wax aan ka aheyn ujeedada sahankaan.

**UK Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (GDPR)**

UK GDPR ka waxaa ku jira tiro xuquuqyo ah, in kasta oo aan kuwan oo dhan lagu dabaqin halka aasaas sharciyeed u leh howsha ay tahay howlo dadweyne, oo ay kujirto xuquuqda baabi'inta iyo fududeynta xogta.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato marinka xog kasta oo shaqsi ahaaneed oo ay hayso Ipsos MORI kahor inta aan la tirtirin Sebteember 2021. Waad la noqon kartaa ogolaanshahaaga iyo shaygaaga macluumaadkaaga shakhsiyeed ama jawaabaha sahaminta ee aad bixiso, wakhti kasta ka hor inta aan xogta la hawl galinin soo tebinta (6 Abriil 2021)

NHS England guud ahaan uga jawaabtaa codsiyada la xiriira xuquuqdaada hal bil gudaheed, in kastoo ay jiraan waxyaabo ka reeban tani. Ogeysiiska Asturnaanta ee NHS England wuxuu sharxayaa xuquuqda aad leedahay iyo sida loo isticmaalo. https://www.england.nhs.uk/contact-us/privacy-notice/

Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Information Commissiner's Office (ICO) haddii aad ka walwalsan tahay sida aan u hawl galinay xogtaada shaqsiyeed. Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta ku saabsan sida loola xiriiro Information Commissiner's Office https://ico.org.uk/global/contact-us/ ama adoo u diraya emayl ahaan: casework@ico.org.uk.

**Sideen ula xiriiri karaa Ipsos MORI iyo NHS England wixii ku saabsan sahamintan iyo/ma xogtayda shaqsi ahaaneed?**

**Xiriirka Ipsos MORI:**

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid cilmi-baarista, fadlan la xiriir kooxda cilmi-baarista. Waxaa kala xiriiri kara:

Iimayl: GPPatientSurvey@ipsos.com

Boostada:

GPPS Team - Ipsos MORI
3 Thomas More Square
London E1W 1YW

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama aad ubaahantahay macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ogeysiiskayaga asturnaanta, u hoggaansanaanta qaanuunka ilaalinta

xogta ama macluumaadka aan kaa hayno, fadlan la xiriir Waaxda Waafajinta. Waxaa kala xiriiri kara:

Iimayl: compliance@ipsos.com oo leh "20-066337-01 GPPS" layn mowduuca ee iimaylka.

Boostada:

Ref: 20-066337-01  GPPS
Compliance Department
Ipsos MORI
3 Thomas More Square
London E1W 1YW
**Xiriirka NHS England:**

Ilmayl: england.contactus@nhs.net

Telefoon: 0300 311 22 33

Boostada:

NHS England
PO BOX 16738
Redditch
B97 9PT